

Helitaanka dib u buuxinta degdega ah ee daawooyinka ee laga helayo farmashiye iyo beddelaada qalabka caafimaad ee raaga ka dib marka la iska soo daadgureeyo musiibo.

Su'aasha 1. Goorma ayay farmashiistayaasha Oregon sameyn karaan dib u buuxin degdeg ah oo loogu talagalay daawo la isku qoro?

Jawaabta. Farmashiistayaashu waxay tan u sameyn karaan qof ku qasbanaaday in uu ka tago meel ay saameysay musiibo lagu dhawaaqay.

Su'aasha 2. Maxay farmashiyayaashu sameyn karaan marka ay jirto dib u buuxinta daawada oo degdeg ah?

Jawaabta. Farmashiye kasta oo ku yaala Oregon ayaa bixin kara dib u buuxinta degdega ah ee daawada. Waa la doorbidayaa, xaaladaha qaarkoodna waxaaba laga yaabaa in ay fududahay, in la isticmaalo isla shirkadii buuxisay daawadii asalka ahayd ee la isku qoray.

Su'aasha 3. Goorma ayay farmashiistayaasha Oregon sameyn karaan dib u buuxinta degdega ah ee daawooyinka iyada oo aanay jirin daawo la isku qoray oo ansax ah?

Jawaabta. Haddii farmashiistuhu aaminsan yahay in daawada loogu baahan yahay in lagu ilaaliyo caafmaadka bukaanka ama lagu sii wado daaweyn la dejiyay, farmashiyaha ayaa sameyn kara dib u buuxinta.

Su'aasha 4. Muddo intee le'eg ayaa wax buuxinta farmashiiste loogu talagalay?

Jawaabta. Dib u buuxinta degdega ah ee daawada waxaa dhici karta in aysan ka badnaan 30 maalmood oo la isa siiyo.

Su'aasha 5. Sidee baan u helaa daawada la isku qoro in dib la iigu buuxiyo haddii aan lumiyo buuxintayda hadda jirta?

Jawaabta. Waxaad tagi kartaa farmashiye kasta oo ku yaala Oregon, kan ugu habboon mid ka socda isla shirkadii buuxinta asalka ahayd, oo codsan kartaa dib u buuxinta degdega ah oo 30-maalmood ah.

Su'aasha 6. Farmashiiste dib ma u buuxin karaa waxyaabaha la xakameeyo 'controlled substances' marka ay jirto musiibo?

Jawaabta. Xaaladaha qaarkood. Sida caadiga ah, tani waxay u baahan tahay oggolaansho hore oo farmashiistaha ah.

Su'aasha 7. Ma jiraa kharash ku baxaya daawada la isku qoro ee degdega ah?

Jawaabta. Way u badan tahay. Farmashiye ayaa biilka caymiska u soo dalici doona si caadi ah, waxaana dhici karta in uu jiro co-pay la xiriira.

Su'aasha 8. Maxaa dhacaya haddii aanan lahayn caymis, ama aan dhibaato ku qabo helitaanka daawada la isku qoro oo dib la iigu buuxiyo oo aan ku jiro caymis uu daboolayo Barnaamijka Caafimaadka Oregon (Medicaid).

Jawaabta. Haddii aadan lahayn caymis ama qabto su'aalo kale oo ku saabsan helitaanka dib u buuxinta degdega ah ee daawooyinka, Maamulka Caafimaadka Oregon ayay dhici kartaa in uu wax caawiyo. E-mail Barnaamijka Daaawada La isku qoro ee Maamulka Caafimaadka Oregon ugu dir: OHA.pharmacy@odhsoha.oregon.gov

Su'aasha 9. Maxaan sameeyaa haddii aan dhibaato ku qabo helitaanka daawada la isku qoro oo dib la iigu buuxiyo oo aan ku jiro caymis uu daboolayo caymis bixiye gaar ah?

Jawaabta. La xiriir shirkadaada caymiska oo la shaqee farmashiyahooda si aad u hesho in dib laguugu buuxiyo daawooyinka oo kharashaadkana loo daboolo. Haddii macaamiishu ay la kulmaan dhibaatooyin, waxay u doodayaasha macaamiisha ee gobolka ka wici karaan 888-877-4894.

Intaasi waxaa dheer, Barnaamijka Daaawada La isku qoro ee Oregon in uu bixiyo, barnaamijka kaarka qiime dhimista daawada, oo gobolku taageero oo loo yaqaan Array Rx. Array Rx:

- Wuxuu u furan yahay qof kasta oo degan Oregon.
- Ma laha dakhli xaddidan.
- Ma laha kharashka xubinimada ama shuruudo.

Macluumaad dheeraad ah iyo meelo la sii gelayo 'links' si la isku diiwaan geliyo ayaa laga helayaa dhanka internet-ka iyada oo la adeegsanayo website-ka Barnaamijka Daaawada La isku qoro ee Oregon:

<https://www.oregon.gov/oha/hpa/dsi-opdp/pages/index.aspx>. Kuwa u baahan caawimaad si ay isku diiwaan geliyaan waxay isku diiwaan gelin karaan telefoon ahaan, khadka bilaashka ah: 1-800-913-4146.

Su'aasha 10. Sidee baan u beddelaa ilkaha macmalka ah ama qalabka caafimaad ee raaga haddii aan leeyahay Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP)?

Jawaabta. Fadlan la xiriir daryeel caafimaad bixiyahaaga ama Shaqaalaha Kiiska ee Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon. Wax kala doorashada la heli karo way isbeddeshay iyada oo ku saleysan xaalada musiibada. Waxay sida caadiga ah gacan ka geysan karaan in ay aqoonsadaan fursadahaaga kala doorasho oo isku-dubaridaan beddelaadaha.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso oo lacag la'aan ah. Mavel Morales kala xiriir OHA.ADAModifications@odhsoha.oregon.gov ama 1-844-882-7889. Waan aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan.

Public Health Division
Prescription Drug Program

OHA.pharmacy@odhsoha.oregon.gov

